

## XAASHIDA MACLUUMAADKA ADEEGYADA HEALTHCHEK IYO UURKA LA XIRIIRA

### HEALTHCHEK- XAQIQDA OGOW!

Ma ogtahay in barnaamijka Medicaid ee Ohio ay ku jirto **Healthckek** ee carruurta ilaa 21 jirka ah? (Adeegyadan mararka qaar sidoo kale waxa loo yaqaan EPSDT.) **Adeegyada** Healthckek waxay ka caawiyaan carruurta inay caafimaad qabaan waxayna yareeyaan fursadda cudurka iyadoo la daawaynayo dhibaatooyinka caafimaad xilli hore. Dhammaan adeegyada **Healthckek** waa lacag lacag la'aan. Waxaad ka heli kartaa caawimo iyo macluumaad adiga oo la xiriiraya Isu-duwaha Healthckek ee degmadaada, ama qorshahaaga daryeelka la maareeyey, iyo adiga oo booqda: <http://medicaid.ohio.gov/FOROHIOANS/Programs/Healthckek.aspx>

#### **Adeegyada Baadhitaanka**

Dhakhaatiirtu waxay rabaan carruurta inay maraan baadhitaanka caafimaadka carruurta inta ay korayaan si markaa loo ogaan karo dhibaatooyinka caafimaad xilli hore. Hubinaha caafimaad ee **Healthckek** ay daboolayso waxaa kamid ah:

- ❖ Baadhitaanada ilkaha
- ❖ Tallaalada, haddii loo baahdo
- ❖ Baadhitaanada aragga
- ❖ Baadhitaanada koritaanka
- ❖ Baadhitaanada xanuunka maskaxda
- ❖ Baaritaannada Nafaqada
- ❖ Baadhitaanada maqalka
- ❖ Baadhitaanada jidhka

Hooyooyinka waa inay maraan baadhitaanada dhalmada ka horeeya, carruurtuna waa inay maraan baadhitaanda marka: dhalashada, 3 ilaa 5 maalmood jirka, iyo 1, 2, 4, 6, 9, 12, 15, 18, 24, iyo 30 bilood jirka. Intaa kadib, carruurta waa inay ugu yaraan maraan hal baadhitaan sanadkii. Dhamaan carruurta waa in laga baadhdo ku-sumowga birta (curiyaha lead).

#### **Adeegyada Daawaynta**

Haddii dhakhtarku uu ogaado dhibaato inta hubinta caafimaad socoto, dhakhtarku waxa laga yaabaa inuu bixiyo daawaynta, ama wuxuu kuu gudbin karaa dhakhtar kale. Healthckek ayaa bixinaysa adeegyada daawaynta. Adeegyada qaar waxay u baahan karaan in horay loo ansixiyo. Haddii ilmahaagu aanu ku jirin qorshaha daryeelka la maareeyey oo uu ubaahan yahay oggolaansho hore si uu adeegyada u helo, dhakhtarkaagu wuxuu u baahan doonaa inuu ka codsado Ohio Medicaid. Haddii ilmahaagu kujiro qorshaha daryeelka la maareeyey, dhakhtarkaaga ayaa qorshaha ka codsan doona oggolaansho hore. Haddaadan ku qanacsanayn go'aanka ay gaartay Ohio Medicaid ama qorshahaaga daryeelka maareeyey, waxaad codsan kartaa in cabashadaada la dhagaysto. Ugu tag isu-duwahaaga Healthckek wixii macluumaad dheeraad ah.

#### **Adeegyada Taageerada**

Magacyada, cinwaanada iyo lambarrada taleefanada Isu-duwayaasha degmooyinka oo dhan waxa laga heli karaa <http://medicaid.ohio.gov/Portals/0/For%20Ohioans/Programs/countycoordinators.pdf> ama iyada oo la wacayo Waaxda Degmadaada ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska. Haddii aad u baahan tahay inaad hesho dhakhtar, dhakhtarka ilkaha ama bixiye daryeel caafimaad oo kale, Isu-duwaha Healthckek ee degmadaada ayaa ku siin kara liis. Isu-duwahaaga Healthckek sidoo kale wuxuu kaa caawin karaa inaad qabsato ballamaha dhakhtarka iyo inaad hesho gaadiidka aad dhakhtarka ugu tagayso. Haddii ilmahaagu kujiro qorshaha daryeelka la maareeyey, qorshuhu sidoo kale wuxuu ka caawin karaa qabashada ballamaha dhakhtarka iyo inuu siiyo gaadiidka dhakhtarka uu ugu tagayo. Qorshaha ayaa sidoo kale kusiin kara liiska dhakhaatiirta kujira qorshahooda. Waxaad ka fiirin kartaa wixii macluumaad dheeraad ah websaytka qorshaha.

Waxaad waydiisan kartaa Isu-duwahaaga Healthckek inuu kuu gudbiyo Head Start, barnaamijka Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruurta (WIC), Help Me Grow (Iga Caawi Korriinka), iyo Xafiiska Carruurta Qabta Naafanimo Caafimaad (Bureau for Children with Medical Handicaps). Isu-duwahaaga Healthckek wuxuu ku siin karaa magacyada hay'adaha kale ee kaa caawin kara inaad hesho dhar, guryo, cunto, iyo adeegyo kale. Sidoo kale waxaad su'aalaha ku gudbin kartaa adiga oo isticmaalaya foom barta internetka ah oo laga helo <https://www.odjfs.state.oh.us/healthckek/index.asp>.

# XAASHIDA MACLUUMAADKA ADEEGYADA HEALTHCHEK IYO UURKA LA XIRIIRA

**Fadlan buuxi macluumaadka soo socda** si aad nooga caawiso inaanu adeegyada **Healthcheksi**no adiga iyo/ama ilmahaaga. Haddii aanad fahamsanayn qayb ama dhammaan qaybaha foomkan, fadlan la xiriiir Isu-duwaha Healthchek ee degmadaada. **Fadlan ku soo celi Xaashidan Macluumaadka**Isu-duwaha Healthchek ee Degmadaada, ama **boostada ku celi adigoo isticmaalaya gal-waraaqeedka bushqaddan ku jira. Fadlan hayso waraaqda lagu soo daray si ay kuuugu noqoto kayd aad u noqoto haddii loo baahdo.**

## Macluumaadkaaga

Magaca Koowaad:		Magaca Danbe:	
Lambarka Kiiska:		Taariikhda Dhalashada	
Cinwaanka Jidka, Abaarmenta Lambarka:			
Magaalada:	Gobolka:	Sib Koodhka:	Degmada:
Emeyl:		Telefoonka:	

## Macluumaadka Ilmahaaga

Magaca Ilmaha:	Lambarka SSN ama Lambarka Biilka Medicaid:
Magaca Ilmaha:	Lambarka SSN ama Lambarka Biilka Medicaid:
Magaca Ilmaha:	Lambarka SSN ama Lambarka Biilka Medicaid:
Magaca Ilmaha:	Lambarka SSN ama Lambarka Biilka Medicaid:

Ilmahaagu ma ka diiwaangashan yahay qorshaha daryeelka la maareeyey ee Medicaid?

- Haa, Magaca Qorshaha: \_\_\_\_\_
- Maya. Kahor intaadan qorshaha iska diiwaangalin, xaqiiji in dhakhaatiirtaada ama xarumaha caafimaadka (ama kuwan ilmahaaga) inay ku qoran yihiin liiska bixiyayaasha qorshaha.

## Adeegyada Baadhitaanka Healthchek

**Healthchek**waxay siinaysaa baaritaanada caafimaad, taalaallo (durniin) waxbarashada caafimaadka iyo baaritaannada shaybaarka ee qof walba oo ku jira Medicaid kana yar da'da 21 sano jir. Sidoo kale waxay dabooshaa baadhitaanada caafimaadka, aragga, ilkaha, maqalka, nafaqada, cilmi-nafsi, iyo baaritaanada caafimaadka maskaxeed. Baadhitaanadani waxay muhiim u yihiin hubinta in ilmahaagu caafiamad qabo oo uu korayo jidh ahaan iyo maskax ahaan. Hooyooyinka waa inay maraan baadhitaanada dhalmada kahor, carruurtana waa inay maraan baadhitaano markay dhashaan, 3 ilaa 5 maalmood markay jiraan iyo markay jiraan 1, 2, 4, 6, 9, 12, 15, 18, 24, iyo 30 bilood. Intaas kadib, carruurta waa inay helaan ugu yaraan hal baadhitaan ee **Healthchek** sanadkiiba ilaa ay ka gaaraan da'da 21 sano jir. **Fadlan sax saar dhammaan adeegyada adiga ama ilmahaagu uu u baahan yahay inuu helo.**

- |  |  |
|--|--|
| <input type="checkbox"/> Baadhitaan caafimaad oo dhammaystiran | <input type="checkbox"/> Baadhitaanka maqalka              |
| <input type="checkbox"/> Baadhitaanka aragga (isha)            | <input type="checkbox"/> Baadhitaanka caafimaadka maskaxda |
| <input type="checkbox"/> Baadhitaanka ilkaha                   | <input type="checkbox"/> Baadhitaan khabiir: _____         |

## Adeegyada Daawaynta Healthchek iyo Gaadiidka Aadaya Ballamaha Daryeelka Caafimaadka

**Healthchek** waxay bixinaysaa adeegyada baaritaannada iyo daawaynta si loo daaweeyo dhibaatooyinka baadhitaanada lagu ogaaday. Adeegyada tijaabooyinka iyo daawaynta qaarkood waxay u baahan yihiin oggolaansho hore. Haddii aad u baahan tahay oggolaanshaha hore, bixiyahaagu waa inuu ku waydiiyo qorshahaaga daryeelka la maareeyey.

Isu-duwahaaga Healthchek wuxuu kaa caawin karaa inaad qabsato ballamo caafimaad, ilkaha iyo ballamo kale waxaanu ku siin karaa gaadiid lacag la'aan ah oo ku geeya ballamaha, haddii loo baahdo. Haddii adiga ama ilmahaaga midkiin uu ka diiwaangashan yahay qorshaha daryeelka la maareeyey, qorshaha ayaa sidoo kale idin ka gacan siinaya ballamaha dhakhaatiirta iyo adeegga gaadiidka. Wuxuu sidoo kale kusiin kara liiska dhakhaatiirta kujira qorshahaaga. Si aad u xaqiijiso in adiga iyo ilmahaagu aad heshaan waxa aad u baahan tihiin, **fadlan sax saar wax kasta oo adiga ama ilmahaagu jeclaan lahaa inuu helo.**

- |   |   |
|---|---|
| <input type="checkbox"/> Liiska dhakhaatiirta                         | <input type="checkbox"/> Liiska xirfadlayaasha kale ee daryeelka caafimaadka  |
| <input type="checkbox"/> Liiska dhakhaatiirta ilkaha                  | <input type="checkbox"/> Gaadiidka aadaya ballamaha caafimaadka iyo ilkaha    |
| <input type="checkbox"/> Gudbinaha Iga Caawi Korriinka (Help Me Grow) | <input type="checkbox"/> Gudbinaha Xafiiska Carruurta Naafada Caafimaad leh   |
| <input type="checkbox"/> Caawimada kale ee helitaanka daawayn         | <input type="checkbox"/> Macluumaad kale oo kusaabsan halka laga helo daawayn |

Miyuu adiga ama ilmahaagu qabaa dhibaatooyin u baahan dareen ama daawayn (tusaale ahaan: dhibaato caafimaad, dhibaato maskaxeed, ilmo aan caadi u korayn, iwm.)?  Haa  Maya

Hadday **Haa**, tahay fadlan tan wax dheeri ah nooga sheeg.

**Macluumaadka kale ee kusaabsan taariikhda ilmahaaga**

- Cunuggayga waxaa laga baaray ku-sumowga birta  Haa  Maya  Ma garanayo  
 Tallaalada ilmahayga (mudista) wakhtigooda waa la siiyaa  Haa  Maya  Ma garanayo  
 Ilmahaygu wuxuu maray baadhitaanada koboca  Haa  Maya  Ma garanayo

**Adeegyada Taageerada**

Isu-duwahaaga Healthckek sidoo kale wuxuu ku siin karaa macluumaad kusaabsan adeegyada jira sida barnaamijka Hooyada, Dhallaanka, iyo Carruurta (WIC) iyo adeegyada taageero ee kale ee lagu bixiyo waaxda caafimaadka deegaankaaga iyo hay'adaha kale. Ma jeclaan lahayd macluumaad kale oo kusaabsan adeegyada kale ee taageero? Fadlan sax saar wixii ku khuseeya oo dhan.

- Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC)  Kaalmada Cuntada  Kaalmada Kulaylinta  
 Head Start  Mid kale: \_\_\_\_\_

Ma jiraa qof qoyskaaga ka mid ah (oo aad adigu ku jirto) oo uur leh?  Haa  Maya

Haddii ay tahay **HAA**, sheeg magaca haweenayda uurka leh: \_\_\_\_\_

Haddii la garanayo, sheeg taariikhda ilmuhu dhalanayo: Bisha \_\_\_\_\_ Sanadka \_\_\_\_\_

Ma jirtaa haweenay uur leh hadda oo dhakhtarka ama rugta caafimaad ugu tagta uurkeeda?  Haa  Maya

Haddii ay tahay **HAA**, sheeg magaca dhakhtarka ama rugta. \_\_\_\_\_

Ma u baahan tahay adeegyo kale oo bulsho?  Haa  Maya

Haddii ay tahay **HAA**, waa maxay adeegyadu: \_\_\_\_\_

Hadda ma ka diiwaangashan tahay qorshaha daryeelka la maareeyey?  Haa  Maya

Haddii ay tahay **HAA**, sheeg magaca qorshaha: \_\_\_\_\_

**Qiritaan**

Waa la i siisay macluumaadka kusaabsan Healthckek. Waxaan fahamsanahay inaan dalban karo adeegyada ama caawimada Healthckek xilli kasta. Waan fahamsanahay in la i waydiisan doono inaan saxeeexo foom fasixitaan oo gaar ah haddii macluumaadkayga caafimaad loo baahdo in cid kale lala wadaago.

Saxeexa		Taariikhda	
Saxeexa Shaqaalaha Kiiska	Taariikhda		Taleefanka
Emailka Shaqaalaha Kiiska:			

**Shaqaalaha Kiiska: Fadlan u gudbi macluumaadkan daryeelka la maareeyey ee Medicaid oo ku haboon.**